



Department
of Health

Macluumaad dheeraad
ah ee ku saabsan FGM

Gudniinta Dumarka (Female Genital Mutilation (FGM)) waa nidaam kaasoo xubnaha taranka dumarka la dhaawacayo ama la baddalayo, laakiin ma jiraan sababo caafimaad oo tan ku saabsan. Waxay si aad u daran u dhaawici kartaa caafimaadka gabdhaha ee waqtiga dheer. Qaar gabdhaha ah waxay u dhintaan dhiig bax ama cudur ka dhasha ee si toos ah maxsuulka nidaamkan uga yimaada. Dumarka lagu sameeyay FGM waxay kala kulmi karaan dhibaato ilmo-dhallidda.

FGM waxaa caadiyan lagu sameeyaa gabdhaha da'doodu u dhaxayso 5 iyo 10. Waxaa loo yaqaan gudniinka dumarka, jaridda ama erayda kale sida sunna, gudniin, halalays, tahir, megrez iyo khitan iyo magacyo kale.

Noocyada FGM:

Nooca 1 – xaaqidda qaar ama dhammaan cadadka- clitoris

Nooca 2 – xaaqidda qaar ama dhammaan ee labadaba cadadka iyo qayb yar oo faruuryaha -labia ah (faruuryaha “lips” ee ku wareegsan xubinta -vagina).

Nooca 3 – xaaqidda qaar ama dhammaan xubinta taranka dumarka, ay ku jiraan cadadka. Isku tolidda geesaha si loogu dhaafo duleel yar.

Nooca 4 – dhammaan noocyada kale ee xanuunka, ay ku jirto jaridda, gubidda, isku-qaloocin, isku-dhisid iyo isku-qaloocin xubnaha taranka dumarka.

Sababtee ayuu FGM u dhacaa?

Waxaa caadiyan u habeeya gabadha waalidkeed ama qoyskeeda in lagu sameeyo FGM. Sababaha loo sameeyo waxaa ka mid ah:

- caado ahaan
- diin ahaan
- dhaqan ilaalin
- bikro ilaalin
- nadaafad ahaan
- dhawridda sharafta qoyska
- bulshada oo aqbashay, gaar ahaan tan la xiriirta guurka

Sababahani ee FGM waxay ku salaysan yihiin faham-darri ama ku baraarug la'aan.

Qaar waxay aaminsan yihii in FGM loogu baahan yihii ka qayb ahaan diintooda, tusaale ahaan Nooca 1 FGM ayaa mararka qaar waxaa si qalad ah loogu yeeraa sunna. Laakiin ma jiraan rqoraalo diini ah kuwaasoo taageeraya FGM ama sheegaya in la sameeyo.

FGM waa sharci-darro

FGM waa sharci-darro waana inaan **weligeed** lagu samayn ama halkan amaba dibadda. Sidoo kalena waa sharci-darro in lagu caawiyi qof kale samaynta FGM si kastaba. Qof kasta ee lagu helo samaynta arrintan wuxuu wajahayaa 14 sano oo xabsi ah in lagu ganaaxo (lana bixin karo ganaax lacageed).

FGM wuxuu keenayaa dhibaato aad u daran caafimaadkaaga

FGM wuxuu ku keenaa dhibaato aad u daran gabdhaha iyo haweenka, ay ku jiraan:

- xanuun joogto ah
- cudurro soo noqnoqda oo ka dhasha kuwaasoo keeni kara dhalmo la'aan
- dhiig bax, soo buurnaan dheecaan leh iyo isku urur xanuun leh
- dhibaatooyin gaadi soo bixidda ama gaadi ceshi la'aan
- isku-buuq, xasuuusasho, is-dhibaatayn
- dhibaatooyin dhalmada/ilmo-dhalidda kuwaasoo keeni kara dhimasho

Maxaad caawinaad heli kartaa?

Haddii lagugu sameeyay FGM, waxaad caawinaad caafimaad iyo taageero ka heli kartaa GP-gaaga iyo xirfadlayaasha daryeel-caafimaad ee kale. Waxaad caawinaad ka heli kartaa umilisadaada haddii aad uur leedahay.

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa faahfaahinaha xarumaha iyo adeegyada ku takhasusay FGM bogga www.nhs.uk/fgm.

Haddii aad ka walaacsan tahay gabar khatar ugu jiri kartaa FGM, u sheeg xirfadlaho caafimaad ee ku daaweyya ama wac khadka-caawinta NSPCC 0800 028 3550, 24saac maalintii.

Haddii aad ka walwalsan tahay in qoyskaagu ama bulshadu cadaadis kugu saarto samaynta FGM ee lagu fuliyo gabadhaada, waydii caawinaad GP-gaaga, booqdaaha caafimaad ama wixii kale ee xirfadle daryeel-caafimaad ah.

Baasaboorka Caafimaadka

Waxaad waydiin kartaa nuqullo ku saabsan ‘*Warbixin ka soo horjeeda Gudniinka Dumarka*’. Tani waa warbixin daabacan oo cabbir buug jeeb la gelin karo ah, lagu helayo 11 luuqadood taasoo aad u qaadan karto markii aad dibadda aadayso. Waxaad tusi kartaa qoyskaaga. Waxay caddaynaysaa in FGM uu dambi aad u daran yahay waddanka UK.

Ka soo aruurinta iyo isticmaalidda macluumaad bukaanno lagu sameeyay FGM

Macluumaadka ku saabsan FGM waxaa soo aruuriyay xarunta Caafimaadka iyo Macluumaadka Daryeelka Bulshada (Health and Social Care Information Centre (HSCIC)). Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan nooca macluumaadka aan aruurinayno, sababta iyo sida aan u isticmaali doono ama diididda in macluumaadkaaga loo isticmaalo qaabkan fadlan eeg www.hscic.gov.uk/patientconf wixii faahfaahin dheeraad ah.

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan FGM, fadlan eeg
www.nhs.uk/fgm